



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.4-aad**

04/11/2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa 4-aad Saac.fur.12:00gd.Saac.Xir.12:50 gd.

Guntinta(Quorum) 150-Xildh.

Ajendaha:-

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
- 2. Ansaxinta Ajendaha**
- 3. Akhrinta 2-aad Hindise Sharciyeedka Saxaafadda**
- 4. Qeybinta Hindise sharciyeedka Iibka iyo Qandaraasyada**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad.

Waxaa shirka Furey Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad Baarlamaanka JFS.Mudane,Mahad Cabdalla Cawad waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

Kadib, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Ajendaha ,Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay sida uu qabo Qod.46-aad ee Xeer-hoosaadka hindise sharciyeedka marka uu marayo akhrinta 2-aad gacanta loo geliyo Guddiga. Wuxuu u yeerey Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta Boostada iyo Isgaarsiinta Mudane Xildh. Cabdi Xaashi ,si uu u akhriyo Hindise Sharciyeedka.

Guddoomiyaha Guddiga Mudane Cabdi Xaashi wuxuu akhriyey soo jeedintiisa oo laba bog ka koobnaa wuxuuna ku bilaabay:waxaa sharaf weyn ii ah anigoo ku hadlaaya Magaca Guddiga Warfaafinta Wacyi gelinta Boostada iyo Isgaarsiinta inaan hortiina isa soo istaago si aan idiinku soo gudbino sharciga warbaahinta Soomaaliyeed. Wuxuu sheegay in sharcigaan Xukuumadda ay u soo gudbisey 19-Maarsa 2015,Guddigana waxaa lagu soo wareejiyey 17-June 2015,markii Wasiirka Mudane Maareeye ka hor akhriyey Golaha Shacabka oo ahaa Akhrinta 1-aad oo ah sida uu qabo Qodobka 44-aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka. Wuxuu intaa ku darey in sharcigaani uusan ahayn kii ugu horeeyey ee Golaha Shacabka la horkeeno .

2007dii Xukuumaddii uu Madax-weynaha ka ahaa Marxuum Mudane C/llaahi Yuusuf Axmed ee lagu shaqeynaayey Gobolka Bay ee Baydhabo. Intaa sharcigaan waa la horkeeni jirey marna lama hirgelin waayo waxaa sabab u ah degenaasha la'aanta Xukuumadihii kala danbeeyey 2007kii ilaa maanta. Maantana hadduu maraayo akhrintii labaad waa ifafaalo wanaagsan in uu ka badbaadey in uu dib u noqdo. Wuxuu kaloo sheegay in ay tababaro iyo aqoon-isweydaarsi loo qabtey Isgaarsiinta Madaxa Banaan ee Dalka ,kuwaas oo ay u qabteyn Hay'ado Caalami ah oo la shaqeeya gacanna ka geysta Horumarinta Saxaafadda. Xubno iyaga ka tirsanna 2014kii waxay ka qeybgaleyn laba kulan oo ay Hay'adda Inter News u qabteyn iyo midkale ay u qabteyn 2015kii.

Guddiga ayagoo la kaashanaaya Garyaqanka Guud ee Qaranka Mudane Cusmaan ,ayey qodob qodob u kor istaageyn Sharcigaan waxna wey ka bedeleyn waxna waa ay ku dareyn. Meelaha qaarna qodobo cusub ayey ku kordhiyeen oo ay u arkeyn iney lagama maarmaan uu u yahay sharcigaan. Maadaama uu sharcigaan ahmiyad gaar ah u leeyahay Dalka baahi weyna loo qabo hirgelintiisa, si is-dhexyaaca badan uga baxo dalka ayey Guddiga sharcigaan si wanaagsan u soo diyaariyeen.

Kadib ,Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta Wacyigelinta Boostada iyo Isgaarsiinta wuxuu u yeerey Xoghayaha Guddiga Mudane Yuusuf Maxamed Cali Si uu akhriyo Qodobada Hindise sharciyeedka Xeerka Saxaafadda .

Mudane Yuusuf Maxamed Cali wuxuu akhriyey Hindise sharciyeedka Warfaafinta oo ka koobnaa 42-Qodob oo ku qornaa 26 bog.

Kadib ,Guddoomiyaha wuxuu u mahadceliyey Xoghayaha Guddiga, wuxuu intaa ku darey in Hindise Sharciyeedka la qeybiyey ee Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada, si fadhigaan midka xiga looga dodo.

Kalfadhiga 7-aad kul.4-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiye k/x.2-aad JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad uu sheegay in uu shirka xiranyahay Saacaddu markey aheyd 12:30 gd.